



## Macluumaad shakhsiyeed oo loo ururiyey bixinta Barnaamijka Ingiriiska Soogalootiga Waaweyn (AMEP)

Adeeg bixiyayaasha AMEP waxaa weydiisatay inay ururiyaan macluumaadkaaga shakhsiyeed Wasaarada Socdaalka iyo Muwaadiniinta. Ururinta macluumaadka waxaa lagu ansixiyey sida waafaqsan Xeerka Migration-ka ee 1958.

Macluumaadka la ururiyey waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo hay'adaha kale ama ururo iyada oo ujeedadu tahay maamulida barnaamijyada dawlada ee kale adeegyadana waxaa ka mid ah:

- Xarumaha daryeelka ilmaha si loo siiyo adeega xanaanada carruurta kuwa xaqa u leh ee macaamiisha AMEP
- Shaqaalaha ka shaqaynaya barnaamijka AMEP Settlement Language Pathways iyo Barnaamijka Tababarida iyo Shaqaalaha
- Adeeg bixiyayaasha kunturaada la leh Wasaarada si loo bixiyo adeega dejinta soogalootiga dhowaan yimid
- Wasaaradaha xukuumada waxaa ku jira:
  - Centrelink, kuwaas oo maamula gunooyinka xukuumadu bixiso;
  - Wasaarada Shaqada iyo Xiriirka Shaqaalaha (DEEWR); iyo
  - Adeegbixiyayaasha loo hawlgeliyey inay bixiyaan adeegyo matalaya DEEWR kuwaas oo ay ku jiraan Job Services Australia iyo Adeegyada Shaqada iyo linta
- Qaybaha booliiska ee xukuumada dhexe, dawlad goboleedka iyo territoriga si loo caawimo baaritaanada ama xaalladaha degdegta ah

Intaas ka sokow, foomka macluumaadka ee 993i oo ilaalinaya macluumaadkaaga khaaska ah wuxuu siiyaa faahfaahinta hay'adaha ay tahay in macluumaadka gaarka ah loo bandhigo. Foomka 993i waxaa laga heli karaa websaytka wasaarada oo ah [www.immi.gov.au/allforms/](http://www.immi.gov.au/allforms/) ama xafiis kasta oo wasaarada ama Xafiisyada dibadaha ee Australia.

### Xuquuqdaada

Haddii aad aaminsan tahay in si qalad ah wasaarada ama adeegbixiyuhu u ururiyey macluumaadkaaga, waxaad warqad u qori kartaa:

The Director

Freedom of Information and Privacy Policy Section

Department of Immigration and Citizenship

PO Box 25

BELCONNEN ACT 2616

Ama u dir email [privacy@immi.gov.au](mailto:privacy@immi.gov.au)

Waa la baari doonaa waxaana lagu sheegi doonaa wixii ka soo baxa.